

Daraasadda **GENVASC** iyo baaritaankaaga **Caafimaad ee NHS**

Ma doonaysaa inaad naga caawiso cilmi baarista aanu doonayno in aanu meesha wax uga qabano **wadne xanuunka?**

Inta aad u jirto shaybaadhkaana caafimaadka NHS waxaanu doonaynaa inaanu kugu soo casuuno inaad ka qayb qaadato daraasadda GENVASC. Waxaad maraysaa baaritaankaaga caafimaadka NHS si loo qiimeeyo khatartaada inaad qaado wadne xanuun ama mushkilado xaaladaha kale ah. Shaybaadhku waxa uu noqonayaa in lagaa qaado muunad dhiiga ah iyo shaybaadh xaaladaha ah kuwaas oo aanu og nahay inay saamayn ku leeyihiin in aad qaadi karto wadne xanuun, sida da'da, jinsiga, dhiigkarka, beer subaga iyo haddii aad cabto ama macaan qabto.

Dhammaan waxyaabahani waa shayo muhiim noo ah anaka inaanu ogaano dadka khatarta ugu jira iyo in aanu qaadno talaabooyin kahortag ah si marka hore loo qaado.

Laakiin, shaybaadhadani maaha boqolkiiba boqol oo dadka qaar lagu sheego inuu yar yahay khatartooda ama dhexaad tahay ayaa weli khatar ugu jiri kara inay qaadaan wadne xanuun. Tani waxay ku timaadaama xaalado kale oo shaqada ah,

tusaale ahaan wadne xanuunka ayaa loo arki karaa inuu badanaa yimaadoqoysaka qaar marka loo eego kuwa kale, markaa hide sidaha iyo DNA ayaa sidoo kale qayb ka ciyaara korodhka khatarta wadne xanuunka.

Maxay ku saabsan tahay **GENVASC** Daraasadda ahi?

Waxaa hormar badan laga sameeyay sidii loo aqoonsan lahaa hide sidaha ee saameeya khatarta wadne xanuunka. Daraasadda GENVASC (oo loosoo gaabiyay Barnaamijka Shaybaadhka Caafimaadka Hide Sidaha iyo Wadnaha), waxaa ka qayb galaya kumanaan dad ah oo adiga oo kale ah oo ujeedadeeduna waa in lagu baadh haddii lagu darayo hide macluumaadka hide sidaga xaalada khatarta ee kale ee la baadhay, ay ka caawin karto saadaasha cida khatarta ku jira inay qaado wadne xanuun?

Waxay ku **taxaluuqdo?**

Ka qayb galka daraasaddani aad ayay u fududahay waxaana lagu daray shaybaadhka caafimaadka. Kaliya waxaa lagaaga baahan yahay waa inaad sadeexo foomka ogolaanshaha ah si aad noogu ogolaato inaanu ugu isticmaalno

macluumaadkaaga caafimaadka ah ee sirta ah iyo inaad nasiiso muunad dhiigaaga ah. Badnaaa muunada dhiiga ah waxaa la iska qaadaa wakhtiga caadiga ah ee aad marayso shaybaadhka oo ma jirin doonto booqasho la socod ah ama daawayn la xidhiidhaa.

Maxaa lagu samayn doonaa **muunada dhiigayga** iyo macluumaadkayga?

Muunada dhiigaaga iyo macluumaadkaaga waxaa lagu kaydin doonaa si sir ah Xarunta Biomedical-ka Wadne Xanuunka Leicester ee NIHR ee daraasaddan loo adeegsado.

Sidee ayuu **ka qayb galkaygu** u ahaanaa sir?

Ka qayb galkaaga daraasadu waxay ahaan doontaaa sir maadaama oo lagu siin doono lambar sir ah oo daraasadda ah oo gaar ah. Cilmi baadhayaasha baadhaya dhiigaaga waxay kaliya yaqaanaan lambarkaaga, magacaaga ma yaqaanaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah

ee ku saabsan sababta ay daraasaddani muhiim u tahay in la sameeyo, fadlan akhri faahfaahinta ka qayb galka macluumaadka xaashidan ku qoran. Haddii aad doonayso inaad ka noqoto kadib marka aad akhrido xaashida macluumaadka faahfaahsan ama wax ka danbeeya oo aad doonto waxaad xor u tahay inaad taas samayso, iyada oo aanad ku mutaysanaynin in daryeelka lagaa kala jaro ama xuquuqdaada sharci.

Ka qayb galku waa ikhtiyaar, laakiin fadlan nagu soo biir. Natiijooyinka oo ku xidhan muunada dad badan oo diyaar u inay ka qayb galaan oo waxay muhiim u tahay in gacan laga gaysto badbaadinta nolosha mustaqbalka.



University Hospitals
of Leicester
NHS Trust



UNIVERSITY OF
LEICESTER



Leicester City Clinical Commissioning Group
West Leicestershire Clinical Commissioning Group
East Leicestershire and Rutland Clinical Commissioning Group



GENERAL
PRACTICE
ALLIANCE



LAKESIDE HEALTHCARE